



DUGSIYADDA GUUD EE PORTLAND DUGSIGA SARE EE WILSON

1151 S.W. Vermont Ave.
Portland, OR 97219
503-916-5280

Gu'ga-Jiilaalka 2011

Dugsiga Sare ee Wilson waxay ku kalsoon yihiin taariikhdooda fiican. Manhajkooda waxbarasho ee culus, waxaa raaca Wilson oo bixiyaan maadooyinka Advanced Placement (Maadooyinka Sare) iyo maadooyinka heerkoodu sarreeyo. Sidoo kale waxaa barnaamijyo quseeya muuqaalka iyo riwaayadaha jilista, sayniska combiyuutarka iyo suuq gelinta.

Fasalka 9-aad, waxay macallimiinta iskaashi la yeeshaan barnaamijka Freshman Communities (Ardayda Cusub) ee waxbarashada caalamka, luqadda Ingiriiska iyo mararka qaarkooda maadada bayoloji, waxaana taageero xagga waxbarashada la siiyaa kooxo yar marka ardayda cusub ay u gudbayaan dugsiga sare.

Barnaamijyada Wilson waxay ardayda u oggolaadaan in ay qaataan maadooyinka waxbarasho ee adag waxaana lagu dhiirgeliyaa waxbarashada heerkeedu sarreyso iyo horumarka maskaxda islamarkaana waxaa fursado la siiyaa ardayda horumar ka garta culuumta farshaxanka si ay u horumariyaan hibada ay leeyihiin..

“Wilson, waxaanu diyaarinaynaa ardayda in ay noqdaan hogaamiyayaal, waanuna caawinaa sidii ay u gaadhi lahaayeen halka ugu saraysa ee yididiiladooda. Dugsiyadeena iyo ardaydeenuba waa ka qayb qaatayaal sare bulshadda koonfur bari ee Portland iyo magaaladeenuba” **Sue Brent, Principal**

Macluumaadka Dugsiga

2011-12 Isgaarsiinta: 1,387

Baro Dugsiga Sare ee Wilson

Habeenka qoyska ee fasaladda sideedaad, 6:15 fiidnimo. Khamiis, Jan. 12

Madooyinka muhimka ah

- **Maadooyinka loo yaqaan Honors:** Luqadaha Ingiriiska, Isbaanishka, Faransiiska, Jarmalka
- **Advanced Placement (Maadooyinka Sare):** English Literature and Composition adabka stdudio-ga , (Qoraalka iyo Dhismaha Luqadda Ingiriiska, Art (Farshaxanka), Art 2D (Farshaxanka Art 2D), Spanish (Isbaanish), Calculus (Kalkalus), Statistics (Istatiistikis), World
- **History (Taariikhda Dunida),** US History (Taariikhda Mareykanka), Government and
- **Politics** (Dawladda iyo Siyaasadda), Microeconomics (Dhaqaalaha Gaarka ah), Psychology (Cilmu Nafsigu)
- Visual and performing arts (Riwaayada iyo Jilista)
- Choir (Kooxaha Heesa)
- Freshmen Communities (Ardayda Cusub)
- Broad range of electives (Maadooyinka la xusho): Marka lagu daro including psychology, computer science, photography, math modeling and dynamic systems, iyo bixinta barnaamijyo satnis ah oo horumarsan.
- Waxaa jira fursado dibedda maadooyin looga dhigto oo ay ka mid tahay barnaamijka Multnomah ESD Outdoor School, tababarro xagga sayniska iyo injiniiriyadda, iyo barnaamijyo badan oo laga qaado jaamacado deegaanka ku yaal.

“Sanadaydii ugu dambaysay dugsiga sare waxay ahayd tii ugu xusuusta badnayd noloshaydii. Qofwalba oo halkan jooga, illaaliyayaasha, macalimiinta, iyo waalidkuba – waxay doonayaan inay kugu habsadaan najaxa” **Daniel Shore, Arday Sare**

“Wilson, waxaa jira fursado badan oo aad isku soo saari kartid” **Lydia Stanford, Arday Sare**

“Waxaan booqday dhowr dugsiyadda sare ah, Wilson waa kan keliya ee ugu badnaa xagga fursadaha iyo fasaladda” **Kellie Weld, Arday heerka dhexe.**

Kooxaha ciyaaraha fudud iyo nashaadka

Hadafka isboortiga Wilson waa in la dhiirgeliyo ciyaartoyda iyo ka qayb qaadashada barnaamijyada ciyaaraha dugsiyada. Barnaamijyada kala duwan ee isboortiga Wilson waxay bixiyaan: baseball (baysbool), basketball (kubadda koleyga), cheerleading (taageerada ciyaartoyda), cross country (orodada banaanada), dance (qoob ka ciyaarka), football (fuutbool), golf (goolif), soccer (kubadda cagta), softball (sofbool), swimming (dabaasha), tennis (teeniska), track & field (ciyaaraha isboortiga ee gudaha iyo dibedda), volleyball (foolibol) iyo wrestling (lagdinta).

Waxyaabaha Ugaadhka ah

- Waxay Wilson ku faanaan maktabadda weyn, oo ay joogto khabiirka maktabadda/qof ku takhasusay warbaahinta, 30,000 oo buug, dhowr kombiyuutar oo leh internet xawligiisu sarreeyo; iyo khadka wayfayga (*wi-fi*).
- Sanad walba, ardayda Wilson waxaa loo xushaa Tababarka Aqoonta Sayniska iyo Barnaamijka Injiniiriyadda (*Apprenticeship in Science and Engineering Program, ASE*). Waaxda Sayniska Wilson waxay qabaan mid ka mid ah shaybaarada ugu fiican gobolka. Waxay ardayda helayaan naadiyo ay ku jiraan nooc walba oo la xiiseeyo, oo ay ka mid yihiin Equestrian (Faras Raacidda), Rugby (Ciyaarta Ragbiga), Lacrosse (Ciyaarta Laakaroots), Ski (Iskii), Frisbee (Farisbii), French Culture (Dhaqanka Faransiiska), iyo Model United Nations (Qaabka Qaramada Midoobay).
- Marka ay ardayda u gudbaan fasalka 10-aad iyo wixii ka dambeeya, xulashada manhajka waa ay kordhaan waxaana ka mid ah madooyinka heerka jaamacadda (*Advanced Placement, AP*) ee Luqadda Ingiriiska, sayniska, xisaabta, sayniska kombiyuutarka, miyuusikada iyo farshaxanka, luqadaha ajnabiga iyo culuumta sayniska bulshada. Waxay Wilson bixiyaan illaa 14 ah madooyinka AP.
- Boqolkiiba 90 ardayda ka baxday Wilson waxay dhigtaan kulliyadaha labada-ama afarta sano. Ardayda qallin jabisay waxay haatan dhigtaan kulliyadaha iyo jaamacadaha ay ka midka yihiin Bowdoin College, Brown University, Carnegie Mellon University, University of Chicago, Northwestern University, Harvard University, Oregon State University, Pomona College, Stanford University, Swarthmore College, University of Oregon, University of Washington iyo Vassar College.
- Waalidiinta ka qayb qaata PTA-ga iyo shaqaalaha waxay wadajir u dhisaan aragtida iyo midnimada bulshada. Munaasabadda xaraashka sanadka ee PTA-ga waa meel loogu deeqayo ciyaaraha iyo mashaariic u gaar ah dugsiya. Wilson Boosters (Naadiga Deeq Uruurinta Dugsiga ee waalidiinta iyo ardaydii hore) waxay soo uruuriyaan kumanaan doolar sanad walba si loogu taageero hawlo iyo ciyaaro kasta.
- Wilson wuxuu ku yaal dhismo cusub oo laban ka sameysan ee ku taal dhul baaxaddiisu ka badan tahay 20 aykar oo ku taal goob xadiiqo la mid ah. Waxay qabaan gegi fuutbool oo leh nalal iyo sideed qaybood ah waddada oroddada, goob dusha ka furan, gegida teeniska iyo meelo ay ka soo geli karaan dadka naafada ah. Portland Parks & Recreation (Xadiiqadaha & Goobaha Lagu Madadaasho) waxaa ku yaal barkadda dabaasha.

Fursadaha Farshaxanka.

Barnaamijka farshaxanku waa ufursad ardayda oo dhan si ay u hal-abuuraan danahooda iyo hibadda la siiyey tan la xidhiidha farshaxanka muuqda, riwaayadda iyo muusiga.

- **Theater** (Riwaayadaha) – Introduction to Stagecraft (Horudhaca Qoraalka iyo Jilista Riwaayadaha), Stagecraft (Qoraalka iyo Jilista Riwaayadaha), Acting (Jilista), Directing and Drama Productions (Soo Saarista iyo Maamulka Riwaayadaha)
- **Instrumental music** (Miyuusikada oo kaliya) – Beginning Band (Billaabidda Kooxda), Concert Band (Kooxda Riwaayadda), Symphonic Band (Kooxda Simfooniga), Wind Symphony (Kooxda Dabeysha), Percussion Ensemble (Garaacidda Wadajirka ee Miyuusikada), Music Theory (Aragtida Miyuusikada) iyo Guitar (Kitaarka)
- **Choral/vocal music** (Miyuusikada kooxda/codka)– Wilson Women (Hablaha Wilson), Wilson Men (Ragga Wilson), Wilsingers and Wilson Advanced Vocal Ensemble –WAVE (Heesaayaasha Wilsingers io Kooxda Codka ee Sare ee Wilson)
- **Farshaxanka muuqda:** Wargeyska, buuga sanadka, qaabaynta 3D, sawirka, midabaynta, daabacaadda, sawirka, qaabaynta warbaahinta, farshaxan sare.

Macluumaad dheeri ah ka eeg aqalka dugsiya Wilson: www.pps.net/schools/wilson

Dugsiyada Dadweynaha ee Portland waa fursado shaqaaleeyn iyo barasho loo simanyahay.

